City of Boston
Emergency Management

# 5 - TABABARKA TIJAABADA SII-WADISTA GANACSIGA

## GUUDMAR

Dukumiintigaan wuxuu sharaxayaa hab-raac lagu tijaabinaayo Qorshe Hawleedkaaga Xaaladaha Degdegga ah iyo Qorshahaaga Sii-wadista Ganacsiga. Tababarradan waxay kaa caawinayaan inaad ogaato dulduleelada ay qorshooyinkaaga leeyihiin ama meelaha u baaahan in laga hagaajiyo iyo inaad qiimeyso hadii shirkaddaada ay awood u leedahay iney sii-wadato hawlaha muhiimka ah markii ay xaalad degdeg ah ama carqalad timaado.

Tijaabooyinkaan waxaa diiradda lagu saaraya qiimeynta ka fal-celinta xaaladaha degdegga ah, istaraatiijiyadaha sii-wadista iyo dib usoo celinta hawlaha muhiimka ah ee ganacsiga iyadoo loo marayo afar tusaale oo xaalado suurtagal ah:

- **In Adeeg La Bixin Waayo Qalab Shaqeyn Waayay Dartiis –** Koronto La'aan
- **In Adeeg La Bixin Waayo Siistam Shaqeyn Waayay Dartiis –** Weerar Dhanka Intarneetka ah
- **In Adeeg La Bixin Waayo Shaqaale Yari Awgeed –** Hakad Wayn oo ku Yimaada Gaadiidka Dadweynaha
- **In La Awoodi Waayo In la Galo Goobtii Ganacsi –** Daad

## AHDAAFTA TIJAABOOYINKA

Adigoo isticmaalaya tusaalooyinka xaaladaha meesha ku qoran, tijaabi heerka waxtarka Qorshe Hawleedkaaga Xaaladaha Degdegga ah iyo Qorshahaaga Sii-wadista Ganacsiga adinkoo:

- Qiimeynaya awoodda aad u leediyiin inaad ka fal-celisaan xaalad degdeg ah aadna badbaadisaan noolayaasha iyo hantida.
- Qiimeynaya awoodda aad u leediyiin inaad sii wadaan hawlaha muhiimka ah ee ganacsiga inta lagu guda jiro carqalad adinkoo isticmaalaya istiraatiijiyadaha sii-wadista.
- Qiimeynaya awoodda aad u leediyiin inaad dib ugu soo celisaan hawlaha sidoodii hore ee caadiga aheyd adinkoo isticmaalaya istiraatiijiyadaha dib-usoo-celinta.
- Qiimeynaya waxtarka go'aan-qaadashada iyo wareejinta mas'uuliyadda.
- Qiimeynaya habraacyadda wada-xiriirka iyo awoodda aad u leedihiin inaad wada shaqeysaan shaqaalaha, macaamiisha, dadka/shirkadaha aad shuraakada tihiin ee banaanka ah inta lagu guda jiro iyo kadib markii ay carqalad timaado.
- Ogaanaya dulduleeladiina ama waxyaalaha hagaajinta u baaahan.

City of Boston
Emergency Management

## HAGIDDA & HIRGELINTA TIJAABOOYINKA TABABARKA

### SAMEYNTA TIJAABADA

- **Dhammaystir Qorshooyinka**: Kahor intaadan bilaabin tijaabinta waxtarkooda, xaqiiji in Qorshe Hawleedkaaga Xaaladaha Degdegga ah iyo Qorshahaaga Sii-wadista Ganacsiga ay si fiican u dhammaystiranyihiin intii karaankiina ah. Dukumiintiyadaan ayaa kaa hagaya ka jawaabida su'aalaha doodda waxayna kaa caawinayaan inaad ogaataan dulduleeladiina ama meelaha hagaajinta u baahan.
- **Samee Yoolal**: Fiiri ujeedooyinka jijaabada si aad u fahanto dhinacyada qorshooyinkaaga ee la tijaabinayo.
- **Meel Aan Qofna Lagu Eedeyneyn:** Ujeeddada tijaabada waa in la ogaado dulduleelada iyo meelaha hagaajinta u baahan, iyadoo aan cidna la dhaleeceyneynin oo kor loo qaadaayo heerka u-diyaargarowga carqaladaha imaan kara. Waa wax la iska ogyahay iney caqabado soo baxaan—tijaabinta qorshooyinka waxay fursad idin siinayaan inaad ogaataan oo aad wax ka qabataan caqabadahaas kahor inta aysan carqalad dhab ah imaanin.
- **Dhiirrigeli Wadahadal Furan**: Isku daya inaad wadahadalada kusoo dartaan shaqaale ka socda waax walba oo ganacsigaaga kamid ah, tusaale ahaan waaxda maaliyadda iyo maamulka, hawlgallada, iibka iyo kuwa lamidka ah. Si dhab ah u qaata tusaale xaaladeed kasta oo maskaxda ku sawira sida ay ganacsigaaga u saamayn karto. U qaata sidii iney tahay xaalad dhab ah oo ka dooda su'aal kasta si faahfaahsan, adinkoo xoogga saaraya sida ay ula xiriirto hawlihiina gaarka ah.

### SAMEYNTA HAGAAJINADA

- **Qor Waxyaalaha Kasoo Baxay Tijaabada:** Kadib markii tijaabada la dhammeeyo, ka dooda wixii kasoo baxay oo qora dulduleelada qorshooyinka ku jira, kuna dar warbixinta ka fal-celinta tijaabada. Kala soo baxa meelaha hagaajinta u baahan adinkoo ku qoraya Qorshaha Hagaajinta Tijaabada kaas oo tilmaamaya tallaabooyinka iyo cidda mas'uulka ka ah sameynta hagaajinada habraacyada ganacsiga iyo dib-u-habeynta Qorshe Hawleedka Xaaladaha Degdegga ah iyo Qorshaha Sii-wadista Ganacsiga.
- **Wax-ka-beddel Qorshooyinkaaga**: Wax-ka-beddela qorshooyinkiina adinkoo isticmaalaya aragtiyadii iyo meelaha u baahan hagaajinta ee aad ogaateen.
- **Tababar Shaqaalahaaga**: Shaqaalaha la wadaag natiijooyinka tijaabada, oo hubi inay helaan nuqulka Qorshe Hawleedka Xaaladaha Degdegga iyo Qorshaha Sii-wadista Ganacsiga ee la cusbooneysiiyay.

## SU'AALAHA DOODDA EE TIJAABADA IYO TUSAALE XAALADEEDYADDA

Macluumaadka soo socda waa nidaamka tijaabada su'aalaha oo cutubyo ka kooban oo loogu talagalay in lagu tijaabiyo qorshooyinkaaga aadna ku ogaado daldalooladooda. Isticmaal su'aalaha doodda hoose ee tusaalayaasha xaaladaha ee daba socda.

## SU'AALAHA DOODDA

### SU'AALAHA CUTUBKA 1AAD

1. **Qorshe Hawleedka Xaaladaha Degdegga ah**

    a. **Wada-xiriirka**

        i. Yaa mas'uul ka ah la socodsiinta xaaladda degdegga ah shaqsiyaadka ama hay'adaha ay khuseyso?

        ii. Yaa u baahan in la ogeysiiyo xaalada, xageese lagu kaydiyaa macluumaadka xiriirka?

        iii. Waa maxay nooca Nidaamka Digniinta ah iyo kan Ogeysiinta ah ee la isticmaali doono si dadka ay khuseyso loola socod siiyo dhibaatadaan, xageese laga heli karaa?

        iv. Waa maxay macluumaadka la galin doonaa ogeysiinta?

    b. **Ka-bixidda Goobta**

        i. Haddii goobta laga baxaayo, intee ku taalaa goobta isu-imaatinka loo qoondeeyay?

        ii. Intee ku taalaa goobta dhismaha katirsan ee loo qoondeeyay in lagu caawiyo shaqaalaha ama macaamiisha baahiyaha gaarka ah qaba sida kuwa naafada ah?

        iii. Yaa mas'uul ka ah caawinta shaqsiyaadka baahiyaha gaarka ah qaba?

        iv. Ma heysataan khariidad muujineysa wadooyin lagu baxsado markii ay xaalad degdega ah soo gudboonaato?

    c. **Meeleynta Dadka ee Gudaha Dhismaha**

        i. Haddii ay jirto meeleynta dadka ee gudaha dhismaha, intee dhismaha kaga taalaa goobta/qolka badbaada loo qoondeeyay?

        ii. Waa intee meesha loo qoondeeyay agabka badbaadada?

        iii. Yaa mas'uul ka ah in uu damiyo siistamyada qalabka hawo-qaadayaasha iyo hawo-keenayaasha?

d. **ILAALINTA HANTIDA IYO QALABKA**

i. Hadii aanay wax dhib ah ka imaaneynin, waa maxay hantida ama qalabka u baahan in la badbaadiyo?

ii. Hantida ama qalabka xagee buu yaalaa?

iii. Waa intee qiyaasta waqtiga lagu badbaadin karo hantida ama qalabka?

e. **Hageyaasha Ka Fal Celinta Xaaladaha Degdegga ah**

i. Xaaladaan oo kale markii ay timaado, ma la raaci karaa mid ka mid ah Hageyaasha Ka Fal Celinta Xaaladaha Degdegga ah?

2. **Qorshaha Sii-wadista Ganacsiga**

a. **Hawlaha Muhiimka ah ee Ganacsiga**

i. Waa maxay hawlaha ganacsi ee muhiimka ah ee xaaladaan ay carqaladeyneyso?
ii. Waa maxay hawlaha ganacsi ee muhiimka ah ee loo aqoonsaday inay yihiin kuwo mudnaan iyo muhiimad sare leh?

b. **Istaraatiijiyadaha Sii-wadista**

i. Istaraatiijiyada sii-wadista Ganacsiga: Tallaabooyin noocee ah ayaad adiga iyo shaqaalahaaga qaadeysaan si aad usii wadaan hawlaha ganacsi ee muhiimka ah ee mudnaanta sare leh ee xaaladaan carqaladeysay?
ii. Shirkadaha Lagu Tiirsanyahay: Ma jiraan shirkado kale oo bixiya kheyraad ama wax-soo-saar si hawlahaan loo qabto?
iii. Wax-soo-saarka: Yaa ka manfacaya wax-soo-saarka hawlahaan?
iv. Waajibaadka: Waajib ma idinku tahay inaad ogeysiisaan qof/dadka in hawlahaan muhiimka ah la carqaladeeyay?

c. **Hababka Wada-Xiriirka**

i. Ma u baahan tihiin inaad Farriin Ogeysiineed oo ku saabsan Xaalada Degdegga ah dirtaan? Haddii ay haa tahay, yaa loo dirayaa?
ii. Waa maxay siistamkiina ugu weyn ee wada-xirrikiina gudaha aad iskula xiriirtaan? Ma jiraa siistam kale oo hadii uu kan weyn shaqeyn waayo la isticmaalo?
iii. Waa maxay siistamtamyadii ugu weyn ee wada-xirrikiina banaanka aad kula xiriirtaan shaqaalaha, shirkadaha/ganacsiyada aad adeegooda ku tiirsantahay, macaamiisha, hay'adaha dawladeed ee ay khusayso? Ma jiraan siistamyo kale oo hadii kuwaas ay shaqeyn waayaan la isticmaalo?

## SU'AALAHA CUTUBKA 2AAD

d. **Istaraatiijiyadaha Dib usoo Celinta**

   i. Faahfaahi istiraatiijiyadaha dib-usoo-celinta lagama maarmaanka u ah dib usoo celinta howlaha muhiimka ah ganacsiga iyo dib u bilaabidda hawlihii caadiga ahaa ee ganacsiga.
   ii. Maxay ahaayeen saameynta dhaqaale ee carqaladaan, sideese wax looga qaban karaa? Xisaabta ku darso kheyraadka soo kabashada ee la heli karo, caymiska iyo kaalmooyinka kale ee dhaqaale.

## TUSAALE XAALADEED

Tusaale xaaladeed kasta waxay u qeybsantahay labo cutub, mid kastaana waxay tijaabineysaa qaybaha Qorshe Hawleedka Xaaladaha Degdegga ah ama Sii-wadista Ganacsiga, isla markaana waxay la xiriirtaa su'aalaha doodda ee kor ku xusan.

## TUSAALE XAALADEEDKA 1AAD: KORONTA LA'AAN - IN LA ISTICMAALI WAAYO QALAB

**Cutubka 1aad**

Cutubkaan wuxuu la xiriiraa qaybaha qorshaha ee soo socda iyo su'aalaha doodda la xiriira ee qeybta kore:

- Qorshe Hawleedka Xaaladaha Degdegga ah
- Qorshaha Sii-wadista Ganacsiga: Hawlaha Muhiimka ah ee Ganacsiga, Istaraatiijiyada sii-wadista, iyo Habraacyada Wada-xiriirka

Khamiis, 7:00 subaxnimo

- Duufaan aad u daran ayaa keentay koronto la'aan taas oo saameysay agagaarkaaga oo dhan.
- Shirkadda korontada ayaa kugu soo wargalisay in korontada laga yaabo inay maqanaato 48 saacadood ama ka badan inta ay ka shaqaynayaan hagaajinta dhibaatada.
- Koronto la'aanta ayaa saameyn ku yeelatay ganacsigaaga, tusaale:
  - Ma isticmaali kartid siistamka kombiyuutarka.
  - Waxay sabatay in qalabka wax qaboojinta uu shaqeyn waayo, taasoo khatar gelisay alaabta qalabkaas la'aantiis aan ahaan karin sida cuntada.
  - Sidoo kale qadkii ayaa baxay, maadaama koronto la'aanta ay keentay intarneet la'aan, taasoo saameysay wada-xiriirka gudaha.
  - Dadkii/shirkadihii badeecada alaabta kuu keenaayay maku soo gaarsiin karaan alaabtii sababo la xiriira fiilooyinkii korontada oo jidka kusoo dhacay.

**Cutubka 2aad**

Cutubkaan wuxuu la xiriiraa qaybaha qorshaha ee soo socda iyo su'aalaha doodda la xiriira ee qeybta kore:

- Qorshaha Sii-wadista Ganacsiga: Istaraatiijiyadaha Dib usoo Celinta Hawlaha Muhiimka ah

Axad, 7:00 subaxnimo

- Duufaantii wey istaagtay, korontadiina waala hagaajiyay oo wey soo laabatay.
- Intarneetkiina dib ayuu u shaqaynayaa.
- Dadkii/shirkadihii badeecada alaabta kuu keenaayay waxay dib u bilaabeen keenista alaabtii.

## TUSAALE XAALADEEDKA 2AAD: WAARAR INTARNEETKA AH - IN LA AWOODI WAAYO IN ADEEG LA BIXIYO

**Cutubka 1aad**

Cutubkaan wuxuu la xiriiraa qaybaha qorshaha ee soo socda iyo su'aalaha doodda la xiriira ee qeybta kore:

- Qorshe Hawleedka Xaaladaha Degdegga ah
- Qorshaha Sii-wadista Ganacsiga: Hawlaha Muhiimka ah ee Ganacsiga, Istaraatiijiyada sii-wadista, iyo Habraacyada Wada-xiriirka

Talaado, 3:00 galabnimo

- Ganacsigaaga waxaa soo wajahay weerar loo yaqaan Siistam Mashuuqlinta Si Aan Adeeg Loo BIxin (DDoS), kaas oo carqaladeeyay websaydka, siistamka dalabkaadka onlaynka, iyo habka lacag-bixinta. Ganacsigaaga/shirkadaada ma awoodi karto iney lacagaha ka qaado macaamiisha qaab onlayn ah ama qaab fool-ka-fool ah.
- Shaqaalaha IT-ga ayaa waxay ogaadeen in weerarku uu si xad dhaaf ah u mashquulinaayo shabakaddaada/siistamkaaga, taas oo adkaynaysa in macaamiisha ay wax kaa iibsadaan.
- Shaqaalaha ayaa soo warinaya in siistamyaha gudaha, oo ay kamid yihiin iimaylka iyo adeegga isticmaalka siistamka shirkadda iyadoo laga fogyahay xarunta shirkadda, mararka qaarkood noqdaan kuwo aan shaqeyneynin.
- Laamaha amniga iyo shirkadaha sekuuritiga internet-ka ayaa lala xiriiray, balse waxay sheegeen inay ugu yaraan qaadaneyso 24–48 saacadood in la helo xal buuxa gaaro.

**Cutubka 2aad**

Cutubkaan wuxuu la xiriiraa qaybaha qorshaha ee soo socda iyo su'aalaha doodda la xiriira ee qeybta kore:

- Qorshaha Sii-wadista Ganacsiga: Istaraatiijiyadaha Dib usoo Celinta Hawlaha Muhiimka ah

Arbaco, 7:00 fiidnimo

- Weerarkii wuu dhammaaday, xalna waala gaaray.

## TUSAALE XAALADEEDKA 3AAD: CARQALAD DARAN OO KU TIMAADA GAADIIDKA DADWEYNAHA - SHAQAALIHII MA IMAAN KARAAN GOOBTI SHAQO

**Cutubka 1aad**

Cutubkaan wuxuu la xiriiraa qaybaha qorshaha ee soo socda iyo su'aalaha doodda la xiriira ee qeybta kore:

- Qorshe Hawleedka Xaaladaha Degdegga ah
- Qorshaha Sii-wadista Ganacsiga: Hawlaha Muhiimka ah ee Ganacsiga, Istaraatiijiyada sii-wadista, iyo Habraacyada Wada-xiriirka

Isniin, 7:00 subaxnimo

- Duufaanta nor'easter ee jiilaalka ayaa sababtay in adeegga gaadiidka dadweynaha uu hakad ku yimaado, wadooyinkana ay khatar noqdaan in gawaari lagu kaxeeyo, taasoo ka hor istaagtay shaqaalaha inay yimaadaan goobta shaqada.
- Ganacsigaagu wuxuu ku shaqeynayaa hal shaqaale oo kaliya iyadoo ay jirto baahi badan oo macaamiisha in loo adeego ah.
- Shirkadihii badeecada/alaabta kuu keenaayay makuu keeni karaan badeecadii.
- Waxaa la filayaa in duufaantu ay socon doontaa ugu yaraan 48 saacadood.

**Cutubka 2aad**

Cutubkaan wuxuu la xiriiraa qaybaha qorshaha ee soo socda iyo su'aalaha doodda la xiriira ee qeybta kore:

- Qorshaha Sii-wadista Ganacsiga: Istaraatiijiyadaha Dib usoo Celinta Hawlaha Muhiimka ah

Arbaco, 12:00 duhurnimo

- Duufaantii way dhammaatay, adeegga gaadiidka dadweynahana dib ayuu u bilaawday, xaaladaha waddooyinkana khatar ma ahan hadda.
- Dadkii/shirkadihii badeecada alaabta kuu keenaayay waxay dib u bilaabeen keenista alaabtii.

## TUSAALE XAALADEEDKA 4AAD: DAAD - IN LA AWOODI WAAYO IN GOOBTII SHAQADA LA GALO

**Cutubka 1aad**

Cutubkaan wuxuu la xiriiraa qaybaha qorshaha ee soo socda iyo su'aalaha doodda la xiriira ee qeybta kore:

- Qorshe Hawleedka Xaaladaha Degdegga ah
- Qorshaha Sii-wadista Ganacsiga: Hawlaha Muhiimka ah ee Ganacsiga, Istaraatiijiyada sii-wadista, iyo Habraacyada Wada-xiriirka

Isniin, 9:00 subaxnimo

- Duufaan ayaa saameysay Magaalada Boston, tubooyinka waaweyn ee dulka iyo bulaacadihii ayaa buuxsamay, taasoo keentay in si dhaqsi ah uu daad u saameeyo goobtaadii shaqo.
- Bakhaarkiina iyo goobtii hawsha ganacsiga ay ka socotay ayey biyihii daadka galeen ilaa laba inji ayeyn ku fadhiyaan.
- Siistamkii korontada ayaa laga yaabaa inuu khatar ku jiro, taasoo ka dhigaysa ay halis in la galo ama lagu sii jiro dhismaha.
- Waxaa la saadaalinayaa in duufaantu ay socon doonto 12-24 saacadood oo kale.

**Cutubka 2aad**

Cutubkaan wuxuu la xiriiraa qaybaha qorshaha ee soo socda iyo su'aalaha doodda la xiriira ee qeybta kore:

- Qorshaha Sii-wadista Ganacsiga: Istaraatiijiyadaha Dib usoo Celinta Hawlaha Muhiimka ah

Arbaco, 7:00 subaxnimo

- Biyihii daadka wey yaraadeen, laakiin goobtii hawlaha ganacsiga ee weyneyd iyo bakhaarka weli wey qoyanyihiin, weyna wasakhaysanyihiin. Qashinka, kiimikooyinka halista ah, iyo suurtogalnimada wasakhda bulaacadaha ayaa khatar caafimaad oo weyn leh.
- Siistamka korontada ayaa shaqeyn waayay waxaana loo baahnaan doonaa dayactir farsameysan ka hor inta aan hawlaha ganacsiga dib loo bilaabin.

## WARBIXINTA TIJAABADA KADIB

Isticmaala jadwalka hoose si aad u qiimeysaan awoodiina ah inaad gaartaan ujeedooyinka tijaabada ee la tilmaamay. Meel walba oo caqabadaha ka yimaadeen, ku dar natiijooyinkaasi qorshahaaga horumarinta sida "Meelaha Hagaajinta u baahan" si loo xoojiyo ka fal-celinta xaaladaha degdegga ah, istaraatiijiyadaha sii-wadista, iyo dadaallada dib usoo celinta. Sida horay aan usoo sheegnay, meesha waa iney noqotaa meel aan cidna lagu eedeyneyn. Iney caaqabado imaadaan waa wax la filayaa, waxayna fursad idin siinayaan inaad ogaataan dulduleeladiina, waxyaalaha ay tahay inaad hagaajisaan, aadna adkeysaan qorshihiina.

Calaamadee ama sax saar (✔) bukiska ku habboon intii awoodiina ah si aad u gaartaan yoolka la xiriira.

| Yoolka/Ujeedada | La Fuliyay Caqabad La'aan | La Fuliyay iyadoo ay Caqabad jirtay |
|---|---|---|
| 1. Qiimeynta awoodda aad u leediyiin inaad ka fal-celisaan xaalad degdeg ah aadna badbaadisaan noolayaasha iyo hantida. | | |
| 2. Qiimeynta awoodda aad u leediyiin inaad sii wadaan hawlaha muhiimka ah ee ganacsiga inta lagu guda jiro carqalad adinkoo isticmaalaya istiraatiijiyadaha sii-wadista. | | |
| 3. Qiimeynta awoodda aad u leediyiin inaad dib ugu soo celisaan hawlaha sidoodii hore ee caadiga aheyd adinkoo isticmaalaya istiraatiijiyadaha dib-usoo-celinta. | | |
| 4. Qiimeynta waxtarka go'aan-qaadashada iyo wareejinta mas'uuliyadda. | | |
| 5. Qiimeynta habraacyadda wada-xiriirka iyo awoodda aad u leedihiin inaad wada shaqeysaan shaqaalaha, macaamiisha, dadka/shirkadaha aad shuraakada tihiin ee banaanka ah. | | |
| 6. Ogaanshaha waxyaalaha u baahan in laga hagaajiyo kheyraadka. | | |

City of Boston
Emergency Management

## QORSHAHA HAGAAJINTA

Isticmaalaa jadwalka kore si aad u ogaataan meelaha hagaajinta u baahan oo ay caqabado idin kaga imaadeen. Xubin kamid ah shaqaalaha u xilsaar meel walba oo kamid ah meelahaas hagaajinta u baahan, kadibna wax ka beddel Qorshe Hawleedka Xaaladaha Degdegga ah ama Qorshaha Sii-wadista Ganacsiga iyadoo la raacayo waxayaalaha ay tahay in la hagaajiyo ee lagama maarmaanka ah.

| Meesha u Baahan Hagaajinta (Yoolka Tijaabada) | Sidee meeshaan/waxaan loo hagaajin karaa? | Qofka/Xubinta Kooxda ee Mas'uulka ka ah |
|---|---|---|
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |